



Date: 03-11-2016

**War Saxaafadeed ku wajahan Heshiiska nabad raadineed ee dhexmaray Madaxweynayaasha  
Puntland iyo Galmudug**

Kulan ay yeeshen masuuliyiinta Dallad Matelayaasha Hay'adaha iyo bulshada aan Dawlga ahayn Puntland November 3, 2016 oo ka dhacay xarunta Dallaldda ee magaalada Garoowe waxa ay soo dhoweeyeen Heshiiska hor dhaca ahaa ee Madaxweynayaasha Puntland iyo Galmudug ku dhexmaray shirkii Madaxweynayaasyaha Dowlad Goboleedyada Soomaaliya ee ka dhacay Magaalada Abu-Dubey ee dalka Imaraadka Carabta **Oct.30 –NOV 1, 2016**.

Dalladda PUNSAA oo horey u gashay arintaas, soo dhoweynna kala kulantay labadan dhinac, islamarkaana marar badan war-saxaafadeedyo ku soo saartey baaqyo ay tibaaxday in khilaafaadka siyaasadeed ee ka dhexeeya labada maamul sii hurinayso colaada iyo dagaalada ka taagan magaalada Galkacayo iyo guud ahaan gobolka Mudug. Waxayna dhowr jeer ugu baaqday in Madaxdu ay xal u helaan khilaafaadkooda, si ay u suurta gasho in dadweynaha ku nool magaalada Galkacayo iyo guud ahaan gobolka Mudug ay nabad kuwada noolaadaan.

Dalladda Bulshada Rayidka ah ee PUNSAA waxa ay si diiran u soo dhoweyneysaa is-afgaradka dhexmaray labada Madaxweynaha, kaas oo ay u aragto bilowga qaboojinta xasaradda ka oogan Galkacayo iyo fududeynta talaaboyinkii lagu gaari lahaa heshiis iyo nabad ku wada noolaansho waara oo dhex mara bulshada reer Gaalkacayo.

Waxa kale oo PUNSAA u aragtaa is-afgradaka dhexmaray labada Madaxweyne in uu horseedi karo in meesha laga saaro khilaafaadka siyaasadeed ee ka dhexeeya Puntland iyo Galmudug iyadoo loo marayo wadahadal lagu gorfeyyo sababaha dhaliyey khilaafaadka iyo in la maareeyo dareenka colaadeed ee ka dhexeeya dadweynaha labada dhinaca, kaas oo lagu bedelo iskaashi, horumar laga wada shaqeyo iyo wax wada lahaansho dhexmara oo daacad loo yahay.

Waxa PUNSAA u muuqda in mar haddii ay deris yihiin labada dowlad Goboleed ay ka midoobi karaan iskaashina ka yeelan karaan arimo badan oo ay ka mid yihiin aragtiyada la xiriira

sugidda nabdagelyada, horumarinta siyaasadeed ee dalka, kobcinta dhaqaalaha, dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha iyo horumarinta Adeegyada kala duwan ee Bulshasda.

Waxa PUNSAA oo hore iyo haddaba ku hawlan sidii heshiis, nabad waarta iyo iskaashi u dhexmari lahaa Puntland iyo Galmudug ay soo jeedinaysaa in laga faa'ideysto fursadda cusub iyadoo si dhab ah loo lafa gurayo khilaafaadka lana daaweynayo ugu damayntana looga bogsoonayo cudurka iyo bushiga dhexgalay Reer Puntland iyo Reer Galmudug.

Ugu damayntii waxa PUNSAA ay dadweynaha qaybahiisa kala duwan ee Galmudug iyo Puntland ugu baaqaysaa in ay ilaaliyaan iftiinka nuurkiisu hadda muuqdo iyadoo dawladaha iyo dadweynaha looga baahan yahay in laga miradhaliyo heshiika iyadoo loo marayo wadiiqooyin ku habboon xalinta khilaafaadka.

**Guddoomiyaha Bulshada Rayidka ah ee PUNSAA**

**Nuur Shire Osman**

